# Soomaaliya: Al-Shabaab Oo Caburin Ku Haysa Koonfurta Soomaaliya.

***Weerarro aan kala sooc lahayn ee Mucaaradka, Dawladda iyo Ciidamad Midowga Afrika oo burburiyey Muqdisho.***

(New York, April 19, 2010) – Kooxda Islaamiyiinta hubaysan ee Al-Shabaab ayaa dadka rayidka ah ee ku nool koonfurta Soomaaliya kula kacaya falal isugu jira dilal, ciqaab naxariis darro ah iyo falal caburin ah oo lagu xakamaynayo bulshada, sida ay ku sheegtey hay'adda u doodda xuquuqda aadanaha ee Human Rights Watch warbixin ay maanta soo saartay. Al-Shabaab, Dawladda Federaalka KMG ah (TFG), iyo ciidamada Midowga Afrika (AU) ee ku sugan magaaalada ay dagaalladu baabi'iyeen ee Muqdisho ayaa weli sii wada weerarro aan kala sooc lahayn, dil iyo dhaawacyo aan tiro lahayn ee dad rayid ah.

Warbixinta oo 62-bog ka kooban oo loogu magac darey, "Dagaal Naxariis-darro ah , Nabad Naxariis-darro leh : Xadgudubyada ay Soomaaliya ka gaysanayaan al-Shabaab, Dawlada FKMG ah iyo ciidamada AMISOM" waxaa lagu ogaadey in al-Shabaab ay xasilooni weyn ka dhaliyeen deegaano badan oo ku yaal Koonfurta Soomaaliya balse  dadka deegaanku waxbadan ayey ku waayeen nabaddaas – gaar ahaan dumarka. Warbixinta oo salka ku haysa wareysiyo lala yeeshey in ka badan 70 qof oo isugu jira dhibanayaal iyo goob-joogayaal ayaa tibaaxaysa falal ciqaab qallafsan ah sida addimo-goyn iyo karbaashid si joogto ah loo fuliyo iyadoon la raacayn si nidaam sharci ah waafaqsan. Dad lagu eedeeyey khiyaano ama inay dawladda taageeraan – badanaana loo cuskado marmarsiiyo raqiis ah oon caddeymo loo hayn ayaa la kulma dil ama shirqool khaarijin ah. Dagaalyahannada al-Shabaab ayaa ugu hanjabay dil qaar ka mid ah dadkii la wareystey sababtuna ay tahay oo kaliya inay degan yihiin goobaha dawladu ay maamusho ee Muqdisho.

"In kastoo ay al-Shabaab xasilooni ka dhaliyeen deegaannada qaar oo ay muddo dheer dagaalladu daashadeen, hadana waxaa ay adeegsadeen caburin joogto ah iyo awood sheegad naxariis darro ah" ayey tiri Georgette Gagnon, Agaasimaha qaybta Afrika ee Human Rights Watch. "Dadka ku hoos nool maamulka al-Shabaab waxaa ay ku waayeen wax qiimo weyn ugu fadhiya."

Xubnaha muhiimka ah ee beesha caalamka waxay inta badan dhibaatada Soomaaliya ka ciyaaraan kaalin aan wax dhisayn , waxna kama soo qaadaan  xadgudubyada ay gaysanayaan ciidamada Midowga Afrika ee la geeyey Muqdisho si ay u ilaaliyaan dawlada taagta daran ee Soomaliya, ayey sheegtey hay'adda Human Rights Watch.

Maamullada al-Shabaab ee deegaanku waxay awood badan ku bixiyaan inay ilaalo ka qabtaan nolosha gaarka ah ee dumarka waxayna kala ilaaliyaan wax is-dhexgal ah rag iyo dumar ah. Dhowr dumar ah ayaa u sheegey Human Rights Watch in la garaacey, la karbaashey ama la xirey shaah ay iibinayeen darteed si ay qoysaskooda ugu caawiyaan, sababtoo ah in shaqadoodu ay keeneyso inay la macaamilaan ragga. Marar kalena, dumarka ayaa la garaacey kadib markii ay xiran waayeen nuuc gaar ah ee

Cabaayadda – oo ah maro weyn oo madaxa illaa lugaha gaarta – oo ay amreen in la xirto madaxda deegaanku. Sababta dumarku inta badan u xiran waayaan ma ahan inay diidayaan amarkooda ee waa inaysan qoysaskoodu awoodin oo kaliya.

"Gacantiisa ayuu marba kor u qaadayey soona celcelinayey isagoo tirinaya, 'Kow, labo,saddex, afar, shan….'" Haweeney ayaa sidaas u sheegtey Human Rights Watch iyadoo sharxaysa garaacistii  loo geystay, mar ay dibedda uga baxdey aqalkeeda iyadoon xirneyn Cabaayad si ay u soo qabato ilmaheeda yar oo dibedda u cararey. "Aad ayuu u xanuun badnaa oo haddii aan qori haysan lahaa ninkaas waan dili lahaa."

Al-Shabaab waxay kula kaceen ragga dhalinyarada ah iyo wiilashaba xadgudubyo ay ku jiraan in si qasab ah askar loogu qoro iyo tallaabooyin ad-adag oo bulshada lagu xakamynayo. Human Rights Watch waxay wareysatey nin dhallinyaro ah oo arkayey adeerkiis oo la diley kadib markii uu sheegi waayey halka uu jiro wiil kale oo 15-jir ahaa oo uu adeer u ahaa, oo isaga baxay ciidankooda markuu dagaal ku dhaawacmey. Garaacista iyo bahdilka ayaa ahaa wax si jooogto ah loogu qaadayey ragga fal dembiyeedyo baahsan oo isugu jira masjidka oo ay tegi waayeen, inay timo-dheer daysteen iyo xirashada lebis al-Shabaab u haystaan inay yahay mid reer Galbeed.

"Xadgudubyada ka jira deegaanada ay maamulaan al-Shabaab waxaa wehliya, in dhamaan dhinacyada oo dhami ay ka mas'uul yihiin xadgudubyo xeerarka dagaalka ah oo si aan yaraanayn weli uga sii socda Muqdisho," ayey tiri Gagnon said. "Dad badan oo Somaali ah ayuu soo foodsaarey dagaal aan kala sooc lahayn, xadgudubyo kala jaad ah oo argagax leh iyo falal dilal khaarijin ah oo si naxariis darro ah maalin kasta u dhaca."

Magaalada Muqdishu, Dawlada KMG ah iyo ciidamada 5,300-ka Afrikaanka ah ee AMISOM ka tirsan waxaa ay is hor fadhiyaan mucaarad xoog badan oo u badan Al-Shabaab.

Xoogaga mucaaradka ahi waxay si joogto ah hoobiyayaal ugu soo tuurayeen si aan kala sooc lahayn goobaha ay rayidku degan yihiin ee ay maamusho dawlada KMG ah. Waxayna sida qaalibka ah ka soo tuuraan deegaannada rayidku degan yihiin iyagoo sida muuqata filaya inay ka dhashaan weerarro aargudasho ah oo dhaawici kara sumcada dawladda KMG ah iyo ciidamada AMISOM. Markasta waxay ciidamadani si la mid ah kaga jawaabaan weerarrada aan loo meel dayin. Ciidamada AU-du waxay madaafiic ku garaaceen deegaanno ay dadku aad u degan yihiin iyagoon qaadaynin tallaaboyin ay ku kala soocayaan rayidka iyo bartilmaameedyada milateri.  Human Rights Watch waxay wareysatey dad kala jooga labada dhinac oo arkey xubno ka mid ah qoysaskooda oo cad-cad ugu goo-go'ay weerarada caynkaas ah oo ka hor imanaya xeerarka dagaalka.

Al-Shabaab iyo dagaalyahannada kale ee mucaaradku waxay u hanjabaan isla markaana dilaan dadka rayidka ah ee ay u arkaan inay u debacsan yihiin dawladda KMG ah.  Al-Shabaab waxay sidoo kale fulisey weerarro laga argagaxay oo ismiidaamin ah oo ay la beegsatey dad rayid ah,  sida mid xaflad qalin-jebin

jaamacadeed ah oo ka dhacay Muqdisho oo ay ku dhinteen ugu yaraan 22 qof bishii Disembar 2009-kii.

Faragelinta quwadaha dibeddu ku sameeyaan Soomaaliya waxay aalaaba noqotaa mid aan waxba ka tarin soo celinta amniga. Taageerada xoogga leh ee dawladda KMG ah u hayaan Mareykanka, Midowga Yurub, Midowga Afrika iyo Xafiiska QM u qaabilsan siyaasadda Soomaaliya waxaa ka dhashey in dhinacyadani ay horeba ka cambaareeyaan meel-ka-dhacyada halista ah ee ay gaystaan al-Shabaab balse ay si cad isaga indha tiraan xadgudubyada ay gaystaan Dawladda KMG ah iyo kuwa ciidamada Midowga Afrika. Dawladda Mareykanku waxay ciidamada dawladda KMG ah ee ku sugan Muqdisho u dirtey hoobiyayaal iyadoo ay jirto inaan cidina dhinacyada isku haya dagaalka u isticmaalin hubka si waafaqsan shuruucda dagaalka.

Dawlada Kenya ee deriska ah waxay iyadoo is qarinaysa gacan ka gaysatey in ciidamo dagaallama loo qoro dhallinyaro Soomaaliyeed oo ku jira xeryaha qaxootiga, taasi oo ka hor imanaysa maqaamka bani’aadannimo ee xeryuhu leeyihiin. Ereteriya oo ku dadaalaysa inay xagal daaciso danaha uu gobolka ka leeyahay Itoobiay oo ah cadawgeeda siyaasadeed, ayaa ku caawisey al-Shabaab inay helaan hub. Human Rights Watch waxay si deg-deg ah ugu baaqeysaa dawladaha shisheeye inay dib u qiimeeyn ku sameeyaan siyaasadahooda ku aadan soomaaliya ayna gacan ka gaystaan sidii loo soo afjari lahaa isla xisaabtan la’aanta sii hurinaysa sii socoshada xadgudubyada ugu ba’an.

“Ma jirto si sahlan oo muuqata oo lagu xallin karo mushkilada ka jirta Soomaaliya,” ayey tiri Gagnon. “Laakiin quwadaha shisheeye waaa inay wax ka qabtaan xadgudubyada ay geysanayaan dhinacyada oo dhami, intii ay dhegaha ka awdan lahaayeen kuwa ay geystaan xulafadooda.”

Soomaaliya waxaa daashaday dagaallo hubaysan oo soo socdey tan iyo markii ay dhacdey dawladii ugu dambeysey mid shaqeynaysa sanadkii 1991-kii. Laakiin xaalada ayaa si lama filaan ah u sii xumaatey dabayaaqadii sannadka 2006-da markii ciidamada milateriga Itoobiya ay soo farageliyeen si ay u burburiyaan isbahaysi maxkamada Shareecada Islaamka ah oo la wareegey gacan ku haynta Muqdisho.

Dagaalkii ka dhasheyna waxaa uu iska hor keeney ciidamadii Itoobiya iyo xulafadooda ciidmada dawladda KMG ah oo ay ka horjeedaan kooxo isutegey oo muqaawamo ah ayna ku jiraan al-Shabaab oo ka soo dhex baxay si ay ula dagaallamaan. Dagaalkaasi waxaa uu burburiyey Muqdisho, waxaana uu guryahooda ka saarey boqollaal kun oo Soomaali ah isla markaana waxa ka dhashey masiibo bani’aadannimo oo aad u baaxad weyn taasi oo hadba sii xumaanaysa. Ciidamadii Itoobiya waxay ka baxeen horraantii sannadkii 2009-ka, laakiin dagaalladii waa ay sii socdaan iyagoon qaboobin.

**Hadallo Laga Soo Xigtay Dhibanayaaal Iyo Goobjoogayaal Lagu Wareystey Warbixinta "Dagaal Naxariis-darro ah , Nabad Naxariis-darro leh" ."**

"Ninkayga ayaa dabadeedna la weydiiyey, 'Adiga ma laguugu dhufanayaa 10-ka jeedal ee caadi ahaan lagu dhufto haweenka ay ahayd inay xirtaan Caabayadda' Wuu diidey, waxyna yiraahdeen, 'Hagaag, marka xaaskaga ayaa lagu dhufanayaa.' Nin dhallinyaro ah ayaa markaas igu dhuftey 10 jeedal oo karbaash ah. Si aad ah ayuu ii garaacey illaa aan korkayga oo dhan ka dareemey kulayl iyo xanuun. Gacantiisa ayuu gadaal gaynayey markii uu igu dhufanayo isaga oo tirinaya, Kow, laba, saddex, afar, shan… xannuun aad ah ayaan dareemey oo haddii aan qori haysan lahaa waan ku dili lahaa ninkaas."

–Haaweeney reer Muqdisho ayaa iyadoo daba-cararaysa ilma yar oo ay dhashey oo dibeda u soo cararey ka soo baxdey aqalkeeda iyadoon xirnayn cabaayad waxaana qabtey al-Shabaab lebiskeedii oo aysan xirneyn darteed.

"Haddii ay ku qabtaan adigoon xirneyn Cabaayadda wey ku garaacayaan weyna ku karbaashayaan. Sidaas ayaa aniga igu dhacdey laba bilood ka hor. Waxaan hor taagnaa guryaheenna hortooda, markii aan arkey iyagoo jeedallo iyo qoryo sita, gudaha ayaan u cararey, laakii nin ayaa isoo cayrsadey saddex jeer ayuuna I garaacey. Wuxuu isticmaalay ul mareer ah. Wuxuu yiri, 'Maxaadan u xirneyn Xijaab? Waxaan ku iri ma awoodi karo.' Wuxuu yiri, taasi suurtogal ma ahane, gal gurigaaga'. Waa inaad ama haysataa ama aad gurigaaga ku jirtaa, adiga oo baahan."
–Haweeney beer ku leh meel u dhow degmada Jilib, ee waqooyiga Kismaayo.

"Maalin aniga oo ka imid dugsi Quraan waxaan u imid gurigeena oo hoobiye ku habsadey. Gurigii wuu burburey. Aabahay iyo hooyadeyba wey ku dhinteen. Waxaan u malaynayaa in 4 wiil oo ila dhalateyna ay sidoo kale ku dhinteen – waxaan arkey cadad goo go'an oo gacmo iyo lugahoodii ah oo yaalla meel daash ah oo guriga ka tirsan oo aan ku nasan jirney. Si xun ayaan u naxsanahay wax sidaas ah kama ogi qofka aan ahay." Waxa sidaas yiri;
–Wiil 14-jir ah oo dhammaan qoyskiisii Muqdisho kuwada dhinteen hoobiye ku soo dhacay aqalkooda bishii September 2009.

"Waxay [al-Shabaab] isticmaalaan oo ridaan hoobiyayaal. Waxay fariistaan meel gaar ah waxayna tuuraan mid, ama shan hoobiye amaba xataa 10 hoobiye , dabadeedna intey xir-xirtaan ayey isla markiiba baxaaan. Ma jirto si aan ugu caban karno [oo aan ugu sheegi karno inay joojiyaan]. Xitaa haddii aad fiiriso waxa dhici karta in lagu dilo. Hadda weerar jawaab celin ah ayaa imanaya oo aan waxba kala soocayn. Maalin qaar qaraabadeena kamid ah ayaa aqalkooda ku aasmey kadib markii hoobiye ku dhacay guri u dhow – saddex qof ayaa halkaas ku dhimatey. Aqalkeena waxaa awdey burburkii gurigaas soo gaarey. Waxayna noqtey inaan ka soo faagno aqalka."
–Qof hore u deganaa xaafad ay mucaaradku xukumaan ee Muqdisho.